Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya
Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya
Golaha Shacabka

Hadal-qoraalka kalfadhiga 8-aad
Documentiga Kalfadhiga 8-aad kulankiisa: an Caadiga aheyn 1-aad

---

Kalfadhiga 8-aad **Tr:11.04.2016**

Kulankiisa: an Caadiga ahayn 1-aad,Sacad furitan.12:55 gh, Sacada Xiritanka.2:00 gd.

Guntinta: 139 Xildhibaan

Ajendaha:-

1.Furitaanka Aayadaha Qur'aanka kariimka

2.Ansixinta Ajendaha

3.Soo dhaweeynta Madaxweynaha JFS

4.Hadal-jeedinta Guddoomiyaha Golaha Shacabka ee kalfadhiga 8-aad

5.Hadal-jeedinta Madaxweynaha JFS ee ku aaddan furitaanka kalfadhiga 8-aad.

Shir-Guddoomiye,Guddoomiyha Golaha Shacabka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya Mudane:Muxamed Sheekh Cusmaan Jawaari.

1.Waxa shirka furay Guddoomiyaha Golaha Shacabka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya Mudane:Muxamed Sheekh Cusmaan Jawaari,waxaa lagu furay Aayadaha Qur'aanka kariimka uu akhriyay Xildhibaan:Ibraahim Saalax Dayfulah.

2.Guddoomiyaha Golaha Shacabka wuxu xildhibaanada u soo jeediyay in ay ansixiyan ajendaha xildhibaanada wey ansixiyan ajendaha.

3.Guddoomiyaha Golaha Shacabka wuxuu Golaha Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya ku soo dhaweeyay Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya Mudane:Xasan Sheekh M.

4.Guddoomiyaha Golaha Shacabka soo dhaweynta Madaxweynaha JFS,waxaa sharaf weyn inoo ah in uu manta inala joogo Madaxweynaha JFS, Mudane:Madaxweyne aad bad u mahadsan tahay imaatankaagii ad noo timid iyo waqtigagii qaaliga ah ee aad nasiisay, waxan rabnaa in aad noo furto kalfadhiga 8aad oo ah kii ugu danbeyay Baarlamaankan 9-aad, xildhibanada sharafta leh waxan ugu mahad celinaya sidii aad ugu dhabar adeegtan xil gudashadiinii kuna soo shaqeysan duruufo adag adinkoo gudanaya waajibadkii Qaran shacabka Soomaaliyeedna galad ayuu idiin haya,waxaa umahad celinayaa Howlwadeenada Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya, oo ayaga u dhabar adeegay in ay ku shaqeeyan duruufo adag aan la qiyaasi karin.

4.Hadal-jeedin Guddoomiyaha Golaha Shacabka ee furitaanka kalfadhiga 8aad:

- Assalamu Calaykum Waraxmatullahi wa Barakaatu, Allxamdulillahi,Bi-Qudratillahi swt waxaan u wada goobjoognaa oo noo suurtogal ah Mudane:Madaxweyne in aad noo furto kalfadhigii 8-aad ee Baarlamaanka 9-aad ay Soomaaliya yeelatay, kalfadhigan oo ah kii ugu dambeyay ee Golahan Shacabka Soomaaliya u igmaday,Mahad Allah ka sokow, waa mahuraan in aan waxyaalo badan aan is xusuusino.Waa lagama maarmaan in aan isxusuusino Baarlamaanadii la soo dhisay taniyo 1990 wixii ka dambeeyey,in Baarlamaankan 9-aad yahay kii ugu horreeyey oo isagoo bedqaba madashiisa si buuxda u dhameystirayo xilgudashadiisa, taasina mudaneyaal waa nimco Mahad –Alla Mudaneyaal dhaha:Alxamdulilah!.
- Ka Guddoon ahaan,Mudanayaal idinkuna Mahadsanidiin, mid walba oo idinka mid ah naga guddooma lib iyo abaalhayn aan idiinku mahadcelinayo sida wacan oo mihnayahannimoda ku dheehan ee aad noogu fududeyseen gudashada xilkan culus ee guddoonka Golahan aad noogu xilqaamateen, waxaa amaan gaar ah iyo bogaadinba mudan dulqaadka iyo sida aad ugu dhabar adeegteen uguna soo mintideen gudashada xilka madashan shacabka idinku xilqaamay, iyo tabaha iyo bisaylka siyaasadeed aad dalka ugu soo gudbiseen marxaladihii walaaca siyaasadeed ee adkaa oo nasoo maray kalfadhiyadii kala duwanaa ee madashan. Hubaal shacabka Soomaaliyeed gallad buu idiin haya,abaalkeedana Allahu swt unbaa idiin gudi kara. Mudanayaal waa Mahad Allah in aydan marnaba ka gaabin Jarmaadkii socdaalka dheera aan u soo galnay in aan dalkeena ka gudbino xaaladii uu ku sugnaa 2012, oo madasha Baarlamaanka xiga ku xil-wareejinno xaalad siyaasadeed,dimuqraadiyadeed,dhaqaale, iyo bulshadeed ka wacan xaaladii jirtay afar sano ka hor.waxaa xusid mudan in Baarlamaankan asagoo wali bedqaba weli u heelan in uu sii wado waliba xoojiyo jirista wada shaqeyn wacan naga dhaxeyso xukuumadan Federaalka, oo ah xukuumadii sadaxaad ee la dhisay isla madasha gudaheeda. Saadaraadeed, Mudanayaal waa laga maarman inaan xususnaano casharadii iyo waayo aragnimadii aan ka soo kasbanay waxyaalihii sababay bur burka Baarlamaanadii iyo xukuumadihii dalku soo yeeshay tan iyo 2004-tii, siiba markii

marxaladaha kala guurka la galo Aan ku mintidno joogtaynta jirista guulaha la gaaray iyo hormarinta geeddi socodka dhisidda.

Hadal jeedinta Guddoomiyaha Golaha Shacabka kuna aada furitaanka kalfadhiga 8-aad (Akhrista Nuqulka Lifaaqa).

Guddoomiyaha Golaha Shacabka wuxuu ku soo dhaweyay Madaxweynaha J.F.Soomaaliya Mudane.Madaxweyne ku soo dhawow hadal jeedinta kaaga aadan furitaanka kalfadhiga 8-aad.

5.Hadal-jeedinta Madaxweynaha JFS ee ku aaddan furitaanka kalfadhiga 8-aad.

- **Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka S. Mudane:Xasan Sheekh Maxamuud**
- Bismilaah Alxamdulilah wasalaatu wasalaamo cala rasuulilah,Guddoomiye waad mahad santahay soo dhaweyntada iyo warbixinta waafiga ah,waanada iyo dar-daaranka iyo danaha guud ee Soomaaliya iyo mida waajibaadka gaarka ah ee Baarlamaanka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya ee aad noo sheegtay, waad ku mahad santahay intaa ka dib,waxaan rabaa in aan u hambalyeeyo Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya iyo Xildhibaanada sharafta leh oo aan ugu hambalyeeyo furitaanka kalfadhiga 8aad oo ah kan ugu danbeeyo xiligan, inta Guddoomiyaha uu wax ka sheegay ayay sheegid ka mudan tahay dhamaan waxaan waayo arag u nahay waqtigan oo kale bishan April marka la marayo in aan ku jirnay xilaga dhamaadkiisa duruufo adag in aan dib u xusuusano taas oo ka timid xilkasnimada, biseylka,kartida oo Baarlamaanka ka timid,
- Waa guul Soomaaliya u soo hoyatay, sanadahan dambe xiligii aan joognay Baarlamaanka intii uu soo jiray oo mudadiisa oo sii dhamaaneysay ma ayna dhicin waxyaabo badan oo horay ugu soo guurnay oo aan cashar ka baranay ayaa arrintaas ay tahay Baarlamaankii ugu horeeyay oo xildhibaanada wadadii aan horay u soo marnay iyo tan aan hada fadhigan soo gaba gabeyneyno meesha wadada aan soo marnay dhibaato badan ayaa lagala kulmi jiray ,mararka qaar dhiig ayaa leyska keenay, dagaal badan waxyaabo badan ayaan soo marnay, mararka qaar wax soo saarka Baarlamaanka ayaa hoos u dhacsanaa, ilaahay wuxuu noogu gar-gaaray in waxyaabahaas oo dhan in aan wax ka baranay, oo wali ay tahay in aan wax ka baraneyno, wan qaldami karnaa oo bani'adan ayaa nahay wixii qalad oo dhaca in an loo noqoneynin, dhaqankena iyo dhaqanka Baarlamentariga oo mar walba nagu sii kobcayo oo sii garaadsanayo guud ahaan,waxaan leeyahay hambalyo Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya iyo xildhibaanada sharafta leh hambalyo, Soomaaliya waxay ku jirtaa wado dheer oo hayan ah oo dowlad dhisid, dowladii KMG 2000 kun ilaa manta labadaas wan soo heynay maalinba maalinta ka danbeysa hadii aan dib u sii eegno wan ka sii fiicnaneynay wan ka socod fiicneyn, wan ka waayo aragsaneyn,wanka hormarsaneyn,dhinaca dowlad dhisida wan ka muuqaal fiicneyn, mar walba oo ay fududeed wan ka qurux badneyn, waa inaan dhowr casharadaas oo aan baranay aan ku celino oo aan u gudbino Baarlamaanada dowlad

goboleedyada hada cusub aan la wadaagno waayo aragnimadaas aan soo marnay an dhahno wayo aragnimadaas waa tan guusha noo keentay waatan aan ku hagaagnay oo aan ku toosnay Baarlamaanka waa in taas muqaalka guud aan sheegnay waa sidaas, waa wax lagu faano manta waa wax guulo keenay, wax yaabaha dhaca mahan waxyabo Baarlamaanka gudihiisa ka dhacay ee waa wax banaanka ka dhacay ama macaamilka an la kulmeynay oo ah caalamka, 25 sano ka dib ama 27 sano ka dib 1988 dii ayaa noogu danbeysay in Soomaaliya iyo Hay'ada lacagta aduunka ee IMF ay xiriir wada yeeshan Wasiirka Wasaaradda Maaliyadda Mudane:Maxamed Aadan(fargeto) uu labo maalmood ka hor soo saxiixay barnaamij wada shaqeyn kadib markii 27 sano ka dib in ay bilaabatay Soomaaliya iyo IMF wadashaqeyn toos ah, waxaa daliil ii ah in caalamka ku soo qancay Soomaaliya in ay tahay dowlad masu'l ah oo haya'daheeda sharci dajinta iyo haya'daheeda fulinta ay wada leedahay dhamaan masu'l waa wada yihiin bisayl siyaasadeed iyo bisayl dowladnimo ka muuqato in ay leedahay sidaa daraadeed macaamil lala wadi doono mudo kooban, waxan rajeyn doona hay'adaha lacagta aduunka sida dib u dhiskiisa u bilowdo Soomaaliya manta mid deymihii hore ay ku bixiso malahan, deymo cusub siday ku qaadato malahan, manta kiiskas ayaan ka gudbeyna hadii alle yiraahdo, dalka dib u dhiskiisa hay'adihii qaarkood mashaariicdii waa weyneyd ayaa meesha noogu dhamanayay, waxay ka mid tahay waxyaabaha tilmamaya ama diidaya wadada aan soo marney iyo guulaha aan gaareyno, waa run sidii Guddoonka uu shiigay in man daytka nala siiyay ay ahayeen in Dastuurka dib u-eegis lagu sameeyo iyo dalka in aan gaarsiino doorasho xor ah hal qof iyo hal cod ah labadiina shaqooyin ayaa laga qabtay sida la soo sheegay Dastuurka dadaalada laga sameyay iyo howsha hada u taal oo aan aad u aamin sanahay dadaalada Baarlamaanka Federaalka xagiisa oo aad ugu qabsoomi doonto hadii ay fududatana ay wax qabsoomi karaan dhinaca doorashooyinka horay ayaan isla garaney in xukuumad ahaan iyo Baarlamaan ahan in ayna suurta galeyn hal qof iyo hal cod, duruufaha nagu hareeraysan awgeed, waan hubaa in dalka ka dhaqan galeyn cadowga jira iyo dhibaatada jirta awgeed , sidaadaraadeed waxan isla garanay in dalka ka dhacdo doorasho dadban 2016 ka hadii alle yiraahdo,doorashada dadbana wax badan oo ka mid ah ayaa la soo qabtay doorashada dadban waa sharceyay santahay oo nidaam xalaaleynayo ileyn waxaan ka shaqeynayno waa in ay jirto dowladnimo nidaamkas waa wadatashigii balaarna dalka oo dhan hal maalin ka dhacayay,dowladnimo oo wayo aragnimo iyo awood in arrin aad u weyn oo dowlad federaal in dalka ka dhici karto wadankana ka dhaqan gali karto ayagoo kaashaneyso dowlad goboleedyada arrintaas mid fiican oo lagu guuleysto ayay aheyd ra'yiga markii aan soo ururinay meeshii ugu fiicneyd oo wada ogol aheyd, waa tii laga qaatay tii ugu waa weyna oo wada ogol aheyd leyskuna afgartay dhamaan tafaasiishii iyo sida loo dhaqan galin lahaa waatan hada socoto oo shalay iyo manta magaalada muqdisho ka sodeen dowlada dhexe iyo

xukuumada federaalka iyo xukuumadaha maamul goboleedyada ay wada hadlayaan, waxaan suurta galineyna ama ka shaqeynayna dadaalkeedana ku jirna hal mabd'a wixii suurta gal ah in aan qabano oo aan ka gaabinin, maxan qaban karnaa 1,2,3, ayaan qaban karnaa, 4,5, dib aan u dhigano oo maqaban karno, mabd'a labaad waxan dhahnay waxaas waa qaban karnaa aan u yeelno saldhig sharci xalaaleeya oo ka dhiga wax nidaameysan oo sal leh oo meel ay ka soo baxeen iyo cid ogolaatay iyo ogolaansho shacbi in ay helaan tii koowaad waa soo xawilnay waa soo sameynay, wada hadalka Baarlamaanka waa ogolaaday feeska hore hal qof hal cod in dalka ka dhici Karin,waxaan ogol ku qaadanay in Baarlamaanka ahaado 275 xildhibaan, in doorasho dhacdo 2016 ka iyadana ogol ayaan ku qaadanay, siday u dhaceysay dowlada dhexe iyo dowlad goboleedyada in ay gacanta ku hayaan iyadana waa la soo dhameynayaa, waxaa la keenaya Baarlamaanka, Baarlamaanka waa akhrinaya wixii siyaado ku ah waa ka reebaya, wixii ka maqana waa ku daraya, hadii wax leysku qabtana dib baa looga xaajoonaya , in Baarlamaanka iyo xukuumada hadana dib u wada fariistan, waxaan rabaa in wada ogolka wada dhaqan galo, ma dooneyno dadka Soomaaliyeed dadka ay masu'liyada u dhiibteen in ay ii soo xambaarsaneynin koox gaar hay'ado gaar ah ma jirto, waxaan rajeyneyna Baarlamaanka Federaalka sida horay looga bartay arrintaas in ay fududaato, wixii la fududeeyo aya fududaanayo, wixii la culeysiyo waa cuslanayan waliba duruufaheena gaarka ah wax badan faham ayay leeyihiin ,waxaa muhiim ah in aan horay u sii socono oo aan horay u sii dhaqaaqno oo an ku dhiirano dhisida dowladnimada iyo meesha ay manta naga mareyso, manta waa maalin waajib ah in aan halkan ka fuliyo, laakiin Baarlamaanka in ay u fududaato in asagana habraacii uu raaco, waxaan rabaa in aan mar labaad Baarlamaanka u mahad celiyo, rajo badan ayaa ka qabaa anigu wada ogolkaas iyo iyadoo leysla dhinac marin in leysla ogolaan doono isla wada qaadan doono sharciyada loo baahanyahay in aan isla yeeli doono ka dibna maamulka aan u gudubno, waxaan manta iyo waqtigaan ku qaban karno ayan ku qabaneyna,waxaa waqtiga manta an heysano ku qaban Karin dib ayan u dhiganeyna waxaan qaban weyno Baarlamaanka kale ee soo socda ayaa qabanaya,Xukuumada kale ee soo socota ayaa qabaneysa, waxaa kaloo qabanaya Madaxweynaha kale ee soo socda, adigoo heysta wayo aragnimadii wixii la soo qabtay, wayo aragnimada waxaa daliil u ah Xukumada wax qabadkeedii hore iyo hada aadbay u kala duwan yihiin, waxaa ku jirtay waxbarasho, qibrad, Baarlamaanka kale in uu yeelan doono waayo aragnimadaas iyo qibradaas, Baarlamaanka Federaalka xildhibaanada sharafta leh wan u hambalyay nayaa, waan ku bogaadinayaa, waan ku amaanayaa, meesha an manta mareyno ee quruxda badan ul ayaa wax lagu cabiraa ama waa dheeraata ama waa gaabata,marka wanaaga iyo hidiilada aan sheegeyno waxan ku cabireynaa waayo aragnimadii la soo dhaafay iyo Baarlamaankii la soo dhaafay, waxaan ku cabireyna carte laga soo bilaabo ilaa hada waa Baarlamaankii ugu

fiicnaa ee Soomaliya, meeshaas ayaa waxba naga qaldami doono, waxna waa naga xumaan doonan, taas muhiimadeeda waa in wax noo qabsooman, waana noo qabsomayan, waa wax lagu naaloodo laguna faano, waana ku faaneyna, Baarlamaanka Federaalka waxan leeyahay hambalyo inta idiin dhimana waxan illaahay ka baryayaa in ay idiin fududaato dhamaanteen fekarka iyo jahweerka, waxan illaahay ka baryaaya anago sharaf leh oo karamo leh oo heybad leh kuwii xilkoodii iyo mudadoodii dhameystay in aan noqono kuwa aan kala raa-raaricin oo kala jeedin oo dhowr meelood u kala socda in uu alle naga dhigin, waxaan alle ka baryayna muddada kooban ee ino dhiman in la muujiyo, saacad dheeri ah, juhdi badan, dulqaad fara badan, in aan horay u sii socono in alle naga dhigo kuwa ugu wax soo saarka badnaa ugu wax tarka badnaa Baarlamaanka waa mahad santihiin, kalfadhiga 8-aad ee Baarlamaanka Federaalka waa furan yahay.

Kalfadhiga 8-aad, Kulankiisa:1-aad ee an caadiga aheyn,uu shir Guddoominayay, Guddoomiyaha Golaha Shacabka Mudane:Muxamed Sheekh Cusmaan Jawaari,uu sheegay in uu xiran yahay sacada markey ahayd 2:00 gd.